

# Adeegyadeena Kala Duwan

Waxaan bixinnaa adeegyo badan oo kugu haboon kuwaas oo kaa caawin doona inaad u noolaato si madax banaan hadba intii suurtagal ah.

- Qorshaynta booqashooyinka, bixitaannada bannaanka & safarrada iyo u raacitaanka ballamaha ama xiisadaha
- Booqashooyinka bulshada iyo wehelnimada/wehelinta
- Caawinta dadka ay ku adag tahay dhaqdhaqaqa
- Nasinta loogu talagalay Daryeelayaasha qoyska
- Caawimaad ku aadan hawlahu guriga sida diyaarinta cuntada iyo shaqada guriga ee fudud
- Daryaalka hurdada iyo daryeelka hurdo ka toosinta habeenkii ah
- Daryeelka dhamaadka nolosha
- Ka caawinta daawaynta, quudinta iyo daryeelka saxarada/kaadida
- Ka caawinta daryeelka shakhsii ahaaneed oo ay ku jiraan dhaqidda, lebisashada iyo taageerada ceshadka kaadida
- Taageerada loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn ee qaba naafonimada waxbarashada, Ootiisamka ama baahiyoo dheeraad ah/gaar ah
- Taageerada loogu talagalay dadka naafada ah, xusuusta ka lunta, kuwa qaba cudurka Alzheimer ama noocyada kale ee waallida, istaroogga, dhaawaca maskaxda ee la ogaaday, ogaanshaha caafimaadka dhimirka iyo arrimaha caafimaadka guud.

**Qorshe la sameeyay oo loogu talagalay/ku habboon xaaladahaaga**




**02045192654**

**02083663677**

[homecare@enfieldcarers.org](mailto:homecare@enfieldcarers.org)  
[www.enfieldhomecare.org](http://www.enfieldhomecare.org)  
[www.enfieldcarers.org](http://www.enfieldcarers.org)

Britannia House  
137-143 Baker Street  
Enfield, London, EN1 3JL



Lambarka Diiwaanka ee Hay'ada Samafalka: 1140089  
Lambarka Shirkadda: 7149774



**Ma u baahan tahay taageero si aad si madaxbanaan ugu noolaato gurigaaga?**  
**Daryeel aad ku helayo gurigaaga oo aad ka helayo hay'ad samafal oo aad ku kalsoonaan karto.**



## **Waxa aan qabano**

Marka la joogo Enfield Carers Centre kooxdayada daryeelka guriga waxay bixiyaan taageero wax ku ool ah si ay u caawiyaan si dadka ay si madax banaan ugu noolaadaan guryahooda iyo gudaha bulshada deegaanka. Adegeena daryeelka gurigu wuxuu shaqeeyaa 24 saacadood maalintii, 7 maalmood usbuucii, 365 maalmood sanadkii.

## **Cida aan taageerno**

Waxaan adeeg tayo leh siinaya carruurta, dadka waaweyn iyo dadka waayeelka ah ee qaba baahiyaha daryeelka iyo taageerada.

Shuruudaha iyo kharashyada dhabta ah waxa laga hadli karaa xilliga qiimaynteeni bilaashka ah. Way fududahay, kaliya naga soo wac:  
**02045192654.**



## **Ma u baahan taageero si aad si badbaado leh oo madax bannaan ugu noolaato gurigaaga.**

Waxaan rabnaa in qof walba la aqoonsado, la taageero oo la siiyo adeegyo ka caawinaya inay ilaashadaan madax-bannaanidooda, caafimaadkooda iyo ladnaantooda.

Meesha aad ugu wacdo guri waa meel gaar ah. Taasi waa sababta Enfield Carers Homecare ay u bixiso taageero qof ka qof ah si ay kaaga caawiso hawl maalmeedka oo laga yaabo inaysan kuugu fududayn sidii ay ahaan jireen markii hore.



**Enfield Carers Centre waxay kaloo bixisaa adeegyo kale oo kala duwan oo loogu talagalay Daryeelayaasha aan rasmiga ahayn/qoyska ee ilaalinaya qaraabo ama lammaane.**  
Booqo  
websaydkeena:  
[enfieldcarers.org](http://enfieldcarers.org)  
ama wac 02083663677

Xubnaha qoyska iyo saaxiibada mar walba ma joogi karaan; Markaa Shaqaalahaaga Taageerada Daryeelka ee heeganka ah ayaa ah waxa xiga ee ugu fiican. Wuxaan ku faanaynaa inaanu xaqijino in kaliya dadka aadka loogu kalsoon yahay, tababaray iyo kuwa xamaasada leh loo doorto inay la shaqeeyaa Enfield Careers Homecare.

Xaalad kasta oo aad ku sugar tahay, waxaad ku raaxaysan kartaa in, samafal ahaan, aanu halkan kuugu joogno ee ma nihin faa'iido doon.

**Waxaan nahay urur aan faa'iido doon ahayn oo bixiya adeegyada taageerada guriga oo tayo leh oo qiimo ahaana la awoodi karo**

**Nala soo xiriir si aad noogala hadasho baahiyahaaga daryeelka iyo taageerada ee shaksi ahaaneed 02045192654**